

U yeedhaya dhammaan Farshaxanleyda Dhalinyarada ah! KA QAYBGALKA Kani Waa Farshaxan! Ee 2023 AYAA HADDA FURAN



KANI WAA FARSHAXAN! Tartanka farshaxanka da' yarta ee ugu xiisaha badan Ireland ayaa farshaxamiistayaasha dhalinyarada ah ka dalbanaya inay soo gudbiyaan farshaxankooda. Tartanku wuxu u furan yahay farshaxamiistayaasha da'da yar ee heerkaasta oo awoodeed iyo asal kasta, jira 18 iyo wixii ka yar, ee hadda kaga nool jasiiradda Ireland meel uun.

Dhammaan farshaxanada tartanka gelaya waxa lagu soo bandhigayaa TIA-geena dhanka khadka! Bandhig Farshaxan Dhijitaal oo lagu soo bandhigayo kala duwanaanshaha cajiibka ah ee farshaxamiistayaasha da'da yar ee maanta ku nool Ireland.

Mawduuca 2023 waa 'Tani Waa Dhiirigelin!' oo waxaanu rabnaa inaanu ogaano waxa ku dhiirigelinaya!

Waa tan sida looga qaybqaato

1. ABUUR farshaxankaaga

Qaab iyo agabka aad doonto ayaad u isticmaali kartaa abuurista farshaxanka aad ku tartamayso. Adigoo tixgelineyda mawduuca 'Tani Waa Dhiirigelin' oo ku madadaalo sameynta farshaxankaaga. Farshaxankaagu waa inuu noqdaa mid adiga iyo fikirkaaga metelaya.

2. SAWIR ama ISKAAN ka qaad nooca dhijitaalka ah

Markaad dhameystirto farshaxankaaga, waa inaad sawir dhijitaal ah oo tayo sare leh ka qaaddaa.

- Sawir tayadiisa muuqaal sarreyso ama iskaan ka qaad farshaxankaaga.
- Sawirku waa inuu noqdaa mid waadax ah, muuqda oo aan hadh iyo wax ku gudubani jirin.
- Macalin ama qof masuul ah ka dalbo inuu kaa caawiyo sawirista ama iskaanista farshaxankaaga.

Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad soo gudbiso qoraal gaaban oo hordhac ah oo farshaxankaaga ku saabsan, kaas oo loo yaqaan Kelmadda Farshaxamiistaha. Tani waxay noo sheegaysay waxaad isticmaashay si aad u sameyso farshaxankaaga, wuxu ku saabsan yahay iyo waxa kugu dhiirigeliyay. Xaqiiqdii waanu rabnaa inaanu ogaano!

3. SOO GELI soo gudbintaada

Fadlan tilmaamaha ka qaybgalka ka eeg websaydka.

Hubi inaad hesho ogolaanshaha waalid ama masuul.

Farshaxanka aad kaga qaybgelayso soo geli rte.ie/thisisart ka hor habeen barka 8-d Maayo ee 2023.

Qaybaha

Tartanka waxa lagu qiimeyn doona qaybaha soo socda:

- 7 & ka Yar
- 8-11 sannadood
- 12-15 sannadood
- 16-18 sannadood
- Kooxaha (kooxaha dugsiyada iyo bulshada)

Guddida Qiimeynta

Farshaxanka guuleysta ee la isla qaato waxa dooran doona guddi farshaxamiistayaal iyo farshaxan uruuriyayaal ah xirfadley ah. Guddidq sannadkan waxa ka mid ah:

- Tadhg Crowley, Farshaxan Kaydiye Sare, Matxafka Glucksman, UCC
- Aoife Dooley, Farshaxameyste & Qoraa
- Ruth Medjber, Sawir-qaade
- Annie Fletcher, Agaasimaha IMMA, Madxafka Farshaxanka Caalamiga ah ee Ayrleen
- Amanda Coogan, Farshaxamiiste Waxqabad
- Colin Martin, Dugsi RHA & NCA

Billado & Abaalmarino

Guuleystayaasha waxa lagu dhawaaqayaa 10-ka Juun 2023 si loogu beego Cruinniú na nÓg, madalinta qaran ee maskax-furka da' yarta.

Farshaxanada la doorto waxa lagu soo bandhigi doonaa Dawladaha Hoose ee guud ahaan waddanka iyo baraha bulshada.

Booska koobaad ee koox kasta waxa la siin doonaa TIA gaar ah! Guuleystayaasha Abaalmarinta Grand Prix ee khasaatan loogu sameeyay TIA!23 oo uu farshaxamiiste quraaradeed la yaqaan oo Reer Ayrish ah, Róisín de Buitléar.

Waxa sidoo kale jira billad wadarta qiimaheedu yahay €10,000 oo loogu talagalay waxyaabo farshaxan, waxbarasho farshaxan la xiriirta iyo foojaro.

Fadlan booqo websaydkeena ama nagala socoto Instigramka [@tia.ie](https://www.instagram.com/tia.ie) on Instagram si aad wax badan u ogaato.

Maanta Gal

rte.ie/thisisart

Taariikhda ay Xirmeyso

8-da Maayo 2023

La Xiriir

hello@thisisart.ie

FG. Haddii aad waydo wax ku dhiirigeliya oo aad ka dhimbil qaadata soo eeg taxanaha cusub ee This Is Art Club! Khamiisaha 5ta galabnimo ayuu ka baxaa RTÉ2 & RTÉ Player



Clár Éire Iddánach
Creative Ireland
Programme

